

# WARGELINTA GURYAHA



---

Xeerka kaladambeynta  
ee shirkadda guryaha

---

Pako<sup>Suomen</sup>aisapu

# Xeerka kaladambeynta ee shirkadda guryaha

Xeerka kaladambeynta ee shirkadda guryaha waa xeer guur oo laga baro iney ku dhaqamaan dhamaan dadka degan dhismaha. Ujeedada laga leeyahayna waa in la kordhiyo nabad ku deganaanta dhismaha iyo wanaajinta xiriirka dadka dhismaha wada degan. Ogoow xeerkaan waa mid sheqeeynaayo maalin walba.

## Gurigaaga gudahiissa

- Shanqar la'aanta habeebkii: Waa in laga foogaado codadka aadka u dheer saac: 22-07 waqtigaa inta u dhexeyso. Dhar ha dhaqin, Hana dhageysan muusig codkiisu dheer yahay ama ha qeylin xilliga habeebkii.
- Haddii ay marti kula joogto guriga u sheeg inay iska ilaaliyaan in ay codka kor u qaadaan.
- Haddii aad leedahay balakoone ka ilaali inaan laga soo tuurin wax qashin ah ama biyo haddii aad nadiifineysid. Balakoonkaaga laguma sameyn karo cunto, lagumana qeylin karo.
- Haddii shirkadda guriga ay diiday sigaar ku cabida guriga dhexdiisa ama balakoonaha waa in aad la aadaa meesha ay shirkadu u calaamadeysay cabida sigaarka.

## Meelaha dadka ka dhexeeya

- Qofkasta oo dhismaha degan waxaa ku waajibah inuu ilaaliyo nadaafadda meelaha la wadaago sida jaran jarada horteeda, qolka qashinka iyo barxadda dhismaha shirkadda.
- Banaanka yar ee jaran jarada loogama tagi karo wax aan la ogoleyn in la dhigo, sida gaariga cariirta ama baaskiil ee waa in lageeyaa bakhaarada.
- Wax qashin ama iyadoo wasaqeysan lagama tagi karo meelaha dadku wadaagaan ee waa in laga nadiifiyaa.
- Dhig qashinka weelka loogu talagalay raacna sawirka ku dhegan weelka qashinka. Qolka qashinka loogama tagi karo wax aad u weyn sida alaabta guryahay ama qalabka elektarooniga ee idiinka jaba.
- Nadiifinta iyo ka guridda waxaan loogu talagalay qolka qashinka waxa ay u keenaysaa shirkadda dhismaha qarash dheeri ah, taas oo ay ka dhalaneyso in lagu kordhiyo qiimaha guriga dadka dhismaha degan.

## Qofka guriga degan

- Haddii gurigaagu u baahan yahay waxka qabasho deg deg ah, sida fadhiga musqusha oo biyo deyneysa, u soo wac sida ugu dhaqsiiyaha badan shirkadda dayactika. Waad wici kartaa xitaa haddii aad dareento wax cayayaan ah ama raakdooda.
- Haddii aad ku iloowdo furahaaga guriga, shirkada ayaa kuu fureyso guriga (waana lacag adeegaas).
- Shaqqiga masuulka ka ah dhismaha ayaad u sheegeysaa haddii aad dooneysid in albaaka lagu qoro magacaaga ama aad dooneysid inaad waqti ka qabsato sawnada ama baarkinka baabuurta.
- Masuulka dhismaha waxaa loo sheegi karaa xitaa markaad ka dacwooneysid deriska oo ku dhiba. Masuulka dhismaha waxba kama qaban karo hadii cilad degdeg ah jiro.



# KALA XIRIIR

Soogudbinta Wixii cilad farsamo ah ee laxiriira dhismaha aad degan tahay:

**Jenni Juvonen**

Habka guri degista ee sooguuraha,  
Building Bridges -hanke

044 741 1069

[jenni.juvonen@pakolaisapu.fi](mailto:jenni.juvonen@pakolaisapu.fi)



COUNCIL OF EUROPE DEVELOPMENT BANK  
BANQUE DE DEVELOPPEMENT DU CONSEIL DE L'EUROPE

**CEB**

COUNCIL OF EUROPE



CONSEIL DE L'EUROPE

Mashruuca waxaa maalgeliyay Golaha  
Bangiga Horumarinta ee Yurub.

**Pako**<sup>Suomen</sup>**aisapu**

[www.pakolaisapu.fi](http://www.pakolaisapu.fi)